

# SU'AALO & JAWAABO

## KU SAABSAN TALLAALADA CARUURTA EE COVID-19

### ? Miyuu ilmaheyga qaadan karaa tallaalka COVID-19?

**HAA** — Carruurta da'doodu tahay 6 bilood iyo ka weyn waa loo oggolaaday inay qaataan tallaalka. Wakhtiga iyo tirada qiyaasaha waxay ku xirnaan doontaa marka ilmahaaga uu qaatay tallaalkii ugu dambeeyay ee COVID-19 iyo inta qiyaasood ee ay horay u qaateen.

Sida tallaalkada hargabka loo cusboonaysiiyo si ay nooga ilaaliyaan nooca ugu badan ee hargabka ee faafaya, tallaalkada COVID-19 waa la cusboonaysiiyay si ay u caawiyaan ka hortaga noocyo cusub.

### ? Ilmahayga wuxuu dhawaan lahaani maalinta-dhalashada, miyaan sugaa tallaalkintooda?

**MAYA** — Tallaalka COVID-19 waa wax da' u gaar ah, taasoo macnaheedu tahay qiyaasta ay qaadanayaan waxay ku xiran tahay da'da ay jiraan wakhtiga tallaalka.

Dhakhtarka ilmahaaga ayaa hubin doona inay qaataan qiyaasta saxda ah ee da'dooda!

### ? Xaguu buu ilmahayga ku qaadan karaa tallaalka COVID-19?

**Xafiiska dhakhtarkooda caadiga ah ama rugta caafimaadka caruurta!** Weydii waxa ku saabsan barnaamijka Tallaalka Carruurta (Vaccines for Children program) si aad u ogaato in ilmahaaga lagu tallaali karo kharash yar ama kharash la'aan!

Farmashiyada waxay sidoo kale siin karaan tallaalkada hargabka iyo COVID-19 carruurta da'doodu tahay 3 sano iyo ka weyn.

### ? Miyaa mid ka mid ah soo saarayaasha tallaalkada lagu taliyay xagii kuwa kale?

**MAYA** — Tallaalkada wax soo-saarka Pfizer and Moderna waxaa la caddeeyey inay badbaado iyo waxtar u leeyihiin carruurta 6 bilood jirka ah iyo ka weyn. Tallaalka Novavax sidoo kale waxaa loo heli karaa carruurta da'doodu tahay 12 sano iyo ka weyn.

### ? Miyuu ilmo qaadan karaa tallaalo kale oo aan COVID ahayn isla maalin?

**HAA** — Carruurta iyo dadka kale waa inay qaataan in ka badan hal tallaalka isku wakhti haddii ay u baahan yihiin!



# SU'AALO & JAWAABO

## KU SAABSAN TALLAALADA CARUURTA EE COVID-19

**Caruurta ma aha inay u dhintan COVID-19 isla heerka dadka waaweyn.**

### ? Muxuu ilmahaygu ugu baahan yahay tallaalka COVID-19?

Carruur badan, gaar ahaan kuwa da'doodu ka yar tahay 5 sano, ayaa isbitaal loo dhigay COVID-19 dartiis—xitaa carruur aan lahayn arrimo caafimaad oo hoose. Inta badan ee carruurta ee isbitaal ka geeya waa kuwa aan la tallaalin. Iyo, in kasta oo heerka dhimashada carruurta uu ka yar yahay dadka waaweyn, heerka, heerka dhimashada weli waa dhibaato. COVID-19 wuxuu gacan ka geystaa dhimashada carruurta sannadkiiba oo ka sii badan marka loo eego cudurrada kale ee tallaalka-looga-hortagi karo.



### ? Waa maxay saameynta ka imaan karta tallaalka COVID-19?

Saameynta caadiga ah waxaa laga yaabaa inay ka mid ahaato gacan xanuun, madax-xanuun, qandho, iyo/ ama daal. Kuwaan inta badan ma sii raagayaan mana aha kuwo khatar ah ama halis ah.

Saameynta waa calaamado muujinaya in tallaalka uu shaqaynayo si uu u kiciyo difaaca nidaamka jirka (haddii adiga ama ilmahaaga idin helin wax saameyn ah, tallaalka weli wuu shaqaynayaa!)

Saameynta sii khatar ah/aadka u daran aad bay u yar yihiin oo aad bay dhif u yihiin oo aad uga sii yar dhibaatooyinka ka imaan kara caabuqa COVID-19.

### ? Kawaran haddii uu ilmaheygu horey uu ugu dhacay COVID-19?

Wali waa in la tallaala maadaama ay qaadi karaan COVID wax ka badan hal mar! Qaadashada tallaalka waxay ka caawini doontaa inay ka difaacdo noocyo cusub oo waxay sidoo kale ka ilaalin kartaa cuduro khatar ah. Ka hubi dhakhtarka ilmahaaga si aad u ogaato muddada ay tahay in ilmahaaga uu sugo ka dib marka uu ku dhaco COVID-19 si loo tallaalo.

### ? Waa maxay halista ah in uu ilmahayga ku kordho cudurka myocarditis (caabuqa murqaha wadnaha) tallaalka kadib?

**Taani waa wax aad, iyo aad dhif u ah.** Halista cudurka myocarditis (caabuqa murqaha wadnaha) wuu ku sii badan yahay inuu ka yimaado caabuqa COVID-19 xaga ka imaan shaha tallaalka COVID-19. Cudurka Myocarditis ee ka imaada tallaalka waa wax fudud, ku dhawaad dhammaan kuwa uu saameeyay si buuxda ayay u soo kabtaan oo caadi ahaan ma sii raago muddo dheer.